**Tariikh: 09/11/2023**

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.145**

**XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA NIDAAMINTA XAQIIJINTA MACAAMILAADKA MAALIYADEED IYO HUBINTA TAYADA ISGAARSIINTA**

OPM - BIXIT
15 NOV 2023
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 6aad farqadda 4aad ee Sharci LR.005 ee soo baxay 02/10/2023 Sharciga Isgaarsiinta Qaranka.

**Markuu arkay:** Warqadda summaddeedu tahay.WIT/XW/087/2023 ee ku taariikheysan 28/10/2023 kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada.

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.53.11.23** ee **13/11/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Nidaaminta Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo Hubinta Tayada Isgaarsiinta** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimadda uu leeyahay Xeer-nidaamiyaha Nidaaminta Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo Hubinta Tayada Isgaarsiinta.

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1aad**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.53.11.23** ee **13/11/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Nidaaminta Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo Hubinta Tayada Isgaarsiinta** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

## Qodobka 2aad

Waxaa Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana Xeer-nidaamiyaha Nidaaminta Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo Hubinta Tayada Isgaarsiinta.

## Qodobka 3aad

Xeer-nidaamiyaha Nidaaminta Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo Hubinta Tayada Isgaarsiinta waxa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA OFFICE OF THE PRIME MINISTER FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknoolojiyada
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة الإتصالات والتكنولوجيا
مكتب الوزير

**Federal Republic of Somalia**
**The Ministry of Communications & Technology**
**Office of The Minister**

**Tix: WIT/XW/087 /2023** **Taariikh: 28/10/2023**

**Ku: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS** **-Muqdisho-**
Og: Golaha Wasiirada Xukuumadda JFS -Muqdisho-
Og: Wasiir Ku/xigeenka Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada -Muqdisho-
Og: Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada -Muqdisho-

**Ujeeddo: Soo-gudbin "Xeer-nidaamiyaha Nidaaminta Xaqaiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo Hubinta Tayada Isgaarsiinta"**

**Mudane Ra'iisul Wasaare,**

Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada XJFS waxay si xushmad leh halkan ugu soo gudbinaysaa **Xeer-nidaamiyaha Nidaaminta Xaqaiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo Hubinta Tayada Isgaarsiinta.**

Diyaarinta Xeer-nidaamiyahan waxaa eegis ku sameeyay Sharci yaqaanada Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada, Guddi-hoosaadka Tiirka Horumarinta Dhaqaalaha, Wasaaradda Cadaaladda iyo Garyaqaanka Guud ee Dowladda si loo hubiyo inuu waafaqsan yahay Xeerarka Dalka.

Haddaba, Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada XJFS waxay ka codsanaysaa Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha in Xeer-nidaamiyahan loo gudbiyo Xubnaha Golaha Wasiirada si loo ansixiyo.

Wada shaqeyn wacan,

**Mne. Jaamac Xasan Khaliif**
**Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada**

**SUMMAD: XGG/432/2023** **26/10/2023**

**Ku: Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyadda** **Muqdisho**
**Ku: Agaasimaha Golaha Wasiiradda** **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS** **Muqdisho**

**Ujeeddo: Talo Sharci**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda asaga oo tixraacaya Warqadda Summaddeedu tahay: **WC&AD/XAWSH&H/803/2023,** kuna taariikhaysan: **25/10/2023**, Ujeeddadeeduna ahayd **Soo Gudbin "Xeer-nidaamiyaha Nidaamka Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo Hubinta Tayada Isgaarsiinta JFS."** kana Soo baxday Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka.

Hadaba, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan Sharci Lr. 18 ee 29 Janaayo 1976, waxa uu Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyadda u soo gudbinayaa **"Xeer-nidaamiyaha Nidaamka Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo Hubinta Tayada Isgaarsiinta JFS."** oo ay Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka u soo gudbisay Xafiiska Garyaqaanka, si uu uga guto waajibaadkiisa shaqo, ugana bixiyo Talo Sharci.

Sidaa darteed, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda waxa uu ku talinayaa in loo gudbiyo Golaha wasiirada, maadaama uusan ka hor-imaanayn Shareecada Islaamka, Dastuurka, Shuruucda kale ee Dalka iyo Danta Guud, uuna Xafiiska ka gutay waajibaadkiisa Shaqo ee kaga aadanaa si waafaqsan Sharciga.

**FG**: halkaan waxaa ku lifaaqan Xeer-nidaamiyaha Sare ku xusan.

Salaan qadarin leh

**Dr. Saalax Siidii Sh. Cabdiraxmaan**
**Ku-simaha Garyaqaanka Guud ee Dowladda**
**Ahna Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dowladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA * OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL

**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
**Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka**
**Xafiiska Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada**

جمهـــورية الصـــومـــال الفيدراليـــة
وزارة العـدل والشــؤون الدسـتورية
مكـــتب مدير قسم التشريعات والا تفاقيات

**Federal Republic of Somalia**
**Ministry of Justice and Constitutional Affairs**
**Office of Director Legislation and Agreement Department**

Summad: WC&AD/XAWSH&H/503/2023 Tr. 25/10/2023

**UJEEDDO: SOO-GUDBIN "XEER-NIDAAMIYAHA NIDAAMKA XAQIIJINTA MACAAMILAADKA MAALIYADEED IYO HUBINTA TAYADA ISGAARSIINTA JFS"**

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, waxay halkan ku soo gudbinaysaa "Xeer-nidaamiyaha Nidaamka Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo Hubinta Tayada Isgaarsiinta JFS" oo abuuraya hannaan sharci iyo mid maamul oo lagu ilaalanayo tayada isgaarsiinta iyo macaamilaadka maaliyadeed.

Xeer-nidaamiyahan oo ay diyaarisay Wasaaradda Amniga Gudaha, waxay Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurku ka gudatay waajibaadkeeda sharci ee ku aaddan xeer-nidaamiyeyaasha.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa inuu waajibkiiska sharci ee ku aaddan xeer-nidaamiyeyaasha ka guto si hab-raaca ansixintu u dhammeystirmo.

Wada-shaqeyn wacan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA CADAALADDA IYO ARRIMAHA DASTUURKA
MINISTRY OF JUSTICE AND CONSTITUTIONAL AFFAIRS
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Mudane Xasan Axmed Cali
**Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada,**
**Wasaaradda Cadaaladda iyo Arramiha Dastuurka**

Garyaqaanka Guud ee Dawladda =Muqdisho=
Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Xoghayaha joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiir-ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

**Tixraac:XRW/ 107/10/2023** **Taariikh: 24/10/2023**

**Ku: Wasaaradda Caddaaladda iyo Dastuurka** **=Muqdisho=**
**Og: Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyadda** **=Muqdisho=**

**UJEEDDO: Soo-gudbin Xeer-nidaamiyaha Nidaamka Xaqiijinta Macaamilka Maaliyadeed iyo Hubinta Tayada Isgaarsiinta.**

Xoghayaha Joogtada ah ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Xeer Ra'iisul Wasaare **Lr. 125** soona baxay **06/04/2023** iyo Habraaca Diyaarinta Hidise-sharciyeedyada Qodobkiisa 2aad farqadaha (ii) iyo (iii) ee Siyaasadda Diyaarinta Hindise sharciyeedyada, Xeer-nidaamiyeyaasha.

Markuu arkay: In **Xeer-nidaamiyaha Nidaamka Xaqiijinta Macaamilka Maaliyadeed iyo Hubinta Tayada Isgaarsiinta** ay taxliilin iyo hubin ku sameeyeen khubarada Tiirka Hormarinta Dhaqaalaha iyo in Xeer-nidaamiyahan uu muhiim u yahay barnaamijka dayn-cafiska, loona baahan yahay in la dedejiyo.

Tiirku waxa uu u soo gudbinayaa Wasaaradda Caddaaladda iyo Dastuurka, Xeer-nidaamiyaha Nidaamka Xaqiijinta Macaamilka Maaliyadeed iyo Hubinta Tayada Isgaarsiinta si ay uga gutaan waajibaadkooda.

**Wadashaqayn Wacan.**

**Mudane Maxamed Abuukar Zubeyr**
**Xoghayaha Joogtada ah ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha**

JAMHUURIYADDA
FEDERAALKA SOOMAALIYA
Wasaaradda Isgaarsiinta &
Teknolojiyada
Xafiiska Agaasimaha Guud

جمـهورية الصّومال الفيدراليــة
وزارةالإتصالات والتكنولــوجيا
مكتب مذيرالــعـام

Federal Republic of Somalia
**The Ministry of Communications & Technology**
**Office of The Director General**

**Ref: WIT/XAG/ 1557 /2023** **Taariikh: 23/10/2023**

**Ku: Guddi Hoosaadka Tiirka Horumarinta Dhaqaalaha** **=Muqdisho=**
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada =Muqdisho=
Og: Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada =Muqdisho=
Og: Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada =Muqdisho=

Mudane,

**Ujeeddo: Soo-gudbin "Xeer-nidaamiyaha Nidaaminta Xaqaiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo Hubinta Tayada Isgaarsiinta"**

Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada XFS, waxay si xushmad iyo qadarin leh halkan idiin ku soo gudbinaysaa **Xeer-nidaamiyaha Nidaaminta Xaqaiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo Hubinta Tayada Isgaarsiinta oo ay kasoo shaqaysay soona gudbisay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ).**

Xeer-nidaamiyahan waxay ujeedadiisa guud tahay in la dhiso nidaam lagu maamulo dhammaan arrimaha la xiriira la socodka iyo korjoogtaynta macaamilaadka iyo tayada addeegyada Shirkadaha Isgaarsiinta.

Sidaa daraadeed, waxaan ka codsanaynaa Guddi-hoosaadka Dhaqaalaha in Xeer-nidaamiyahan la mariyo ansixin heer farsamo ee Tiirka Horumarinta Dhaqaalaha.

Lifaaqa waxaa ku jira nuqul Xeer-nidaamiyahan ah.

**Wada shaqeyn wacan.**

**Mne. Cabdicasiis Duwane Isaaq**
**Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada**

Via Republic, Mogadishu, Somalia. PO Box 66. Email, dg@moct.gov.so & info@moct.gov.so

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka
Xafiiska Maareeyaha Guud

جمهـــورية الصــومــال الفيدراليـة
الهـيئة القومـية للإتصـالات
مـكتب مـد ير الـعا م

Federal Republic of Somalia
National Communications Authority
Office of the General Manager

TIX: XMG/HIQ/193/2023

16 October 2023

**Ku: Dhamaan Shirkadaha Isgaarsiinta**

**Og: Maareeye Ku Xigeenka Ha'aydda Isgaarsiinta Qaranka**

**Ujeeddo: Wadatashiga Qabyo-qoraalka Xeer-nidaamiyah Nidaamka Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo Hubinta Tayada Isgaarsiinta**

Si loo xoojiyo awoodda korjoogteyn ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka si waafaqsan qodobada 6-aad iyo 16-aad ee Sharciga Isgaarsiinta Qaranka, Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) waxa ay idin soo gudbineysaa wadatashiga qabyo-qoraalka Xeer-nidaamiyaha Nidaamka Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo Hubinta Tayada Isgaarsiinta.

Ujeedka Xeernidaamiyaha ayaa ah in la dhiso nidaamyo lagu korjoogteynaayo arimaha la xiriira tayada adeegyada Isgaarsiinta, la socodka macaamilaadka shirkadaha Isgaarsiinta, iyo xaqiijinta u hoggaansanaanta sharuucda Isgaarsiinta iyo Maaliyadda. Nidaamkan ayaa Hay'adda u sahlaya in ay hesho xog ku filan oo ay ku nidaamin karto suuqa isgaarsiinta, soona saari karto xeer nidaamiyeyaal ku saleysan xog sax ah.

Hadaba, HIQ waxay ay idin ku casuumeysaa in aad soo dirtaan talooyinkiina la xiriira xeer-nidaamiyaha ugu dambeyn **24-ka Oktoobar, 2023**, qaab qoraal ah kaliya, si waafaqsan Qodobka 30-aad, faqradiisa 1-aad ee Sharciga Isgaarsiinta Qaranka.

Talooyinkiina waxaa kusoo diri kartaan Iimeylkan: **consultation@nca.gov.so** . Shirkadii u baahato faahfaafin dheeri, waxa ay soo dalban karaa kulan ka hor 24-ka Oktoobar, 2023.

Waxaan rajaynaynaa in aad waqtiga ilaalisaan.

Mahadsanidiin.

Mustafa Yaasiin Sheekh

Maareeyaha Guud
Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA · NATIONAL COMMUNICATIONS AUTHORITY · OFFICE OF THE GENERAL MANAGER · NCA · XAFIISKA MAAREEYAHA GUUD · HAY'ADDA ISGAARSIINTA QARANKA · JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMALIYA**
**WASAARADDA ISGAARSIINTA IYO TEKNOOLOJIYADA**

# Xeer-nidaamiyaha Nidaamka Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo Hubinta Tayada Isgaarsiinta

Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada 2023

## Qodobka 1aad
## Magaca Xeer-nidaamiyaha

1. Xeer-nidaamiyahan waxaa loogu yeerayaa "**Xeer-nidaamiyaha Nidaamka Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo hubinta Tayada Isgaarsiinta**".

2. Xeer-nidaamiyahan waxaa loo soo saaray si loo dhaqan-geliyo Qodobada 6aad iyo 16aad ee Sharciga Isgaarsiinta Qaranka, 2017.

## Qodobka 2aad
## Ujeeddada Xeer-nidaamiyaha

Ujeeddada guud ee Xeer-nidaamiyahan ayaa ah in la dhiso nidaam lagu maamulo dhammaan arrimaha la xiriira la-socodka iyo kor-joogteynta macaamilaadka iyo tayada adeegyada Shirkadaha Isgaarsiinta, iyadoo ujeeddada laga leeyahayna ay tahay:

b) in la hubiyo in Shirkadaha Isgaarsiintu ay si sax ah uga soo warbixiyaan macaamilaadka maaliyadeed ee wicitaannada, fariimaha, internet-ka iyo addeegyada kale ee dheeriga ah, lagana hortago macluumaad qarsoon ama aan laga soo warbixin;

t) in la xaqiijiyo in Shirkadaha Isgaarsiintu ay u hoggaansamaan shuruucda isgaarsiinta, maaliyadda, canshuuraha, iyo hannaanada kale ee sharci iyo siyaasadeed ee ay dejisay Dawladdu;

j) in la helo hab lagu hubinayo canshuur-bixinta Shirkadaha Isgaarsiinta, iyadoo la baaraayo, lagana hortagayo, islamarkaana la saxayo daldaloolada ka jira habka bixinta khidmadaha iyo canshuuraha;

x) in la xaqiijiyo in qiimo daah-furan oo cadaalad ah laga qaado macaamiisha isticmaala adeegyada isgaarsiinta;

kh) in la hubiyo in shirkad isgaarsiineed kasta aysan si gaar ah uga faa'iidin sababo la xiriira warbixinno maaliyadeed oo been-abuur ah oo ay soo gudbisay ama dhaqamo kale oo aan sax ahayn oo ay ku kacday awgeed;

d) in la xaqiijiyo in shirkadaha isgaarsiintu ay ku bixiyaan waqtiga ku habboon khidmadaha shatiga iyo canshuuraha sharcigu ku waajibiyey;

r) si loogu fududeeyo in Dwladda ay saadaaliso dakhliga mustaqbalka laga heli karo Shirkadaha Isgaarsiinta, iyadoo adeegsanaysa xogaha ay ka heshay Shirkadaha Isgaarsiinta iyo midda ku saabsan dakhligii hore;

j) in Dawladdu ay hesho xog ku filan oo ay u isticmaasho maal-gelinta ku habboon suuqyada isgaarsiinta iyo horumarintoodaba, islamarkaana soo saarto xeer-nidaamiyeyaal ku saleysan go'aanno xog-ogaal ah; iyo

k) in la xaqiijiyo fududeynta kormeerka marinka lacagaha la isugu diro mobeylka (Mobile Money Gateways) iyo macaamilaadka maaliyadeed ee dhexmara shabakadaha isgaarsiinta si looga soo qabto xogta adeegga dheeriga ah ee aan habeysnayn (USSD Center/platforms).

## Qodobka 2aad
## Qeexid

Erayadan soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa macnaha ku hor qoran , haddii aan si kale loogu qeexin xeer-nidaamiyahan dhexdiisa:

b) **"Shirkad Isgaarsiin"** waxaa loola jeedaa shirkad ka heshay rukhsad Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, loona oggolaaday in ay siiso macaamiisha adeegyo isgaarsiineed, oo ay ku jiraan shirkadaha bixiya adeegyada ku hadalka, internet-ka, xargaha badda ka soo degga iyo adeegyada kale ee isgaarsiinta la xiriira;

t) **"Hay'adda"** waxaa loola jeedaa Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo lagu aasaasay Qodobka 3aad ee Sharciga Isgaarsiinta Qaranka ee soo baxay 2017;

j) **"Nidaamka Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo hubinta Tayada Isgaarsiinta"** waxaa loola jeedaa nidaam dhexe oo lagu aasaasay Qodobka 3aad ee Xeer-nidaamayahan, kaasoo loo isticmaali doono kor-joogtaynta iyo hubinta macaamilaadka iyo tayada isgaarsiinta ee Shirkadaha Isgaarsiinta;

x) **"Baaritaanka"** waxaa loola jeedaa baaritaanka iyo hubinta diiwaannada macluumaadka maaliyadeed ee Shirkadaha Isgaarsiinta, si loo hubiyo saxnaantooda, ayna ugu hoggaansan yihiin hannaanka sharci iyo heerka hufnaanta warbixinnadooda maaliyadeed;

kh) **"Dhawrista Xogta"** waxaa loola jeedaa tallaabooyinka iyo farsamooyinka lagu qeexay Sharciga Dhawrista Xogta ee 2023, oo loogu talo-galay in lagu dhawro xogta shakhsiga iyo midda macluumaadka ee macmiilka si looga hortago isticmaalka ama/iyo faafitaanka sharci-darrada ah ee xogtooda; iyo

d) "**Guddiga"** waxaa loola jeedaa Guddi loo xilsaaray Qiimeynta Ganaaxyada iyo Ciqaabaha.

## Qodobka 3aad
## Awood-siinta Hay'adda

Xeer-nidaamiyahan wuxuu awood u siinayaa Hay'adda:

b) in ay kor-joogteyn ku sameyso dhammaan qulqulka xogta isgaarsiinta (Telecommunications Traffic);

t) in ay dhaqan-geliso, rakibto, maamusho Nidaamka Dawladda Maamusho ee Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo hubinta Tayada Isgaarsiinta, si loo helo xogta wicitaannada gudaha iyo dibadda;

j) in ay ka hortagto xatooyada lagu sameeyo wicitaannada (Telecommunications Traffic fraud);

x) in ay la wadaagto xaddiga wicitaannada (Traffic volume) hay'adaha dakhliga ee dawladda si loo hubiyo hufnaanta xogta canshuur-bixinta;

kh) in ay qaado talaabo walba oo suurto-gelinaysa dhaqan-gelinta xeer-nidaamiyahan si waafaqsan Sharciga Isgaarsiinta Qaranka;

d) in ay hubiso tayada adeegyada isgaarsiinta gaar ahaan wicitaannada gudaha, dibadda, iyo xaddiga isticmaalka adeegyada internet-ka;

r) in laga hortaggo wicitaannada iyo SIM kaarada xatooyada ah; iyo

s) in ay hesho xogta u sahlaysa xallinta caqabadaha ka jira suuqa isgaarsiinta ee tartanka suuqa wax u dhimaya.

## Qodobka 4aad
## Ku-xirranka Waajibka ah ee Nidaamka Dawladdu Maamusho ee Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo Hubinta Tayada Isgaarsiinta

1. Dhammaan Shirkadaha Isgaarsiinta waxaa waajib ku ah in ay nidaamyadooda ururinta iyo maareynta macluumaadka ku xiraan Nidaamka Dawladdu Maamusho ee Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo hubinta Tayada Isgaarsiinta, oo ay maamusho Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, laguna dhisay Xeer-nidaamiyahan, si ay Dawladdu si joogto ah ula socoto macaamilaadka maaliyadeed iyo tayada isgaarsiinta.

2. Dhammaan Shirkadaha Isgaarsiinta ee nidaamyadooda ururinta iyo maareynta macaamilaadka ku xiran yahay Nidaamka Dawladdu Maamusho ee Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo hubinta Tayada Isgaarsiinta, waxaa waajib ku ah in ay:
   b) ku dhex sameeyaan dhammaan macaamilaadkooda gudaha nidaamyadooda ururinta iyo maareynta macluumaadka ee ku xiran Nidaamka Dawladdu Maamusho ee Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo hubinta Tayada Isgaarsiinta, si loo hubiyo in dhammaan macaamilaadka loo sameeyey hab daah-furan oo suurto-gelin kara isla-xisaabtanka ku habboon;
   t) xaqiijiyan hufnaanta iyo saxnaanta xogta ku jirta nidaamyadooda ururinta iyo maareynta macluumaadka si loo hubiyo in Nidaamka Dawladdu Maamusho ee Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo hubinta Tayada Isgaarsiinta uu si habsami leh u shaqeeyo loona abuuro kalsooni xooggan oo u dhaxaysa Dawladda iyo Shirkadaha Isgaarsiinta; iyo
   j) hubiyaan in nidaamyadooda ururinta iyo maareynta macaamilaadka ee ku xiran Nidaamka Dawladdu Maamusho ee Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo hubinta Tayada Isgaarsiinta ay si faahfaahsan oo nidaamsan u diiwaan-geliyaan dhammaan macaamilaadka, islamarkaana keydiyaan dhammaan xogta ku saabsan adeegyada ay bixiyeen iyo dhakhliga ka soo galay.

## Qodobka 5aad
## Hab-raaca Rakibidda Nidaamka Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo hubinta Tayada Isgaarsiinta

1. Dhammaan shirkadaha rukhsadda leh waxaa waajib ku ah in Hay'adda ama cid kasta oo ay u soo igmatay Hay'adda in sameyso sahanka goobta

(Site Survey) shabakadahooda ay u ogolaadaan, si loo fududeeyo dhaqan-gelinta nidaamka, iyadoo ay goob-joog yihiin wakiilada idman ee shirkadaha;

2. Dhammaan shirkadaha rukhsadda leh waxaa waajib ku ah in Hay'adda ama cid kasta oo wakiil ka ah in ay u oggolaadaan in ay ku rakibaan, ayna hagaajiyaan qalabka lagu kor-joogteynayo qulqulka wicitaannada isgaarsiinta (Telecommunication Traffic probing systems) si loo helo xogta rasmiga ah ee qulqulka wicitaannada gudaha, dibadda iyo xaddiga internet-ka uu isticmaalay macmiil kasta;
3. Hay'adda ama cid kasta oo ay u idmato (Authorized Agent), waa in ay xaqiijisaa in rakibidda qalabka (Interfacing) in loo sameeyo qaab aysan saameynin habsami-u-socodka iyo tayada qulqulka wicitaanka (Traffic routing) ee shirkadaha;
4. Shirkadda iyo Hay'adda waa in ay ka heshiiyaan kharashka ku baxaya rakibidda qalabka sida internet-ka, korontada iyo halka la dhigayo (hosting, co-location and Electricity) ee ay hay'adda u baahan tahay; iyo
5. Shirkadaha waa in ay ilaaliyaan amniga qalabka la dhigay kuna xiran shabakadahooda, hadii burbur ama dayac ku yimaadana waxaa ka dhalanaya mag-dhaw.

## Qodobka 6aad
## Shuruudaha Xogta Seenyaalaha/Baaqa Wicitaannada
## (Requirements for Extract of Signaling Data)

1. Dhammaan shirkadaha Isgaarsiinta ee Rukhsadda leh waa in ay keydiyaan dhammaan xogta Seenyaalaha/Baaqa (Signaling) lagama-maarmaanka u ah kor-joogteynta qulqulka xogta wicitaannada si waafaqsan xeer-nidaamiyahan.
2. Xogta Seenyaalaha/Baaqa waa in ay ku jirtaa halka uu wicitaan ka yimid (origin), iyo halka uu u socdo (destination), warbixinta adeegga waqtiga iyo qaabka la isugu gudbiyey iyo muddada wicitaanka (call duration).
3. Shirkadaha Isgaarsiinta ee rukhsadda leh waa in ay sii sheegaan haddii ay wax ka bedelayaan xogta Seenyaalaha/Baaqa ama is-bedel kasta oo saameyn ku yeelanaya ku-xirnaanshaha Nidaamka ugu yaraan 7 (todobo) maalmood ka hor, si loo xaqiijiyo habsami-u-shaqeynta qalabka kormeerka.

## Qodobka 7aad
## Waajibaadyada Dheeraadka ah ee Shirkadaha Isgaarsiinta

Marka laga soo tago waajibaadyada kale ee lagu sheegay Xeer-nidaamiyahan, dhammaan Shirkadaha Isgaarsiinta waa in ay:

b) u hoggaansamaan waqtiyada ay u cayintay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka marka ay Hay'adda u soo gudbinayaan macluumaadka, xogta iyo warbixinnada laga dalbaday ama hirgelinta tilmaamo farsamo, si loo fududeeyo jiritaanka nidaam xog-wadaagis oo la isku halayn karo;

t) joogteeyaan nidaam u daah-furan macaamiisha oo muujinaya qiimaha ay u isticmaalaan marka ay iibinayaan adeegyadooda si loo ilaaliyo danaha iyo xuquuqda macaamiisha, korna loogu qaado kalsoonida iyo qanaacada macaamiisha;

j) ku sameeyaan kaabayaashooda teknoolajiyadeed maal-gashiga lagama-maarmaanka ah oo ay ku talisay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka si ay ula qabsadaan horumarka teknoolajiyada ee kor u qaadaya waxtarka nidaamyadooda ururinta iyo maareynta macluumaadka; iyo

x) ku sameeyan horumarinta xirfadda iyo tayada shaqaalahooda maal-gashiga lagama-maarmaanka ah oo ay ku talisay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, si ay ugu hoggaansamaan hannaanka sharci ee lagu hago hawlahooda ganacsi iyo adeeg-bixin.

## Qodobka 8aad
## Qaan-sheegta Cashuuraha

1. Hay'adda waxa ay u gudbinaysaa bil weliba dhammaadkeeda Wasaaradda Maaliyadda Qaansheegta cashuuraha waajibey oo ka kooban ugu yaraan madaxyadan hoose:

b) tirada daqiiqadaha wicitaanada gudaha iyo dibadda;

t) wadarta adeegyada farriimaha ee kala duwan;

j) xaddiga internet-ka la isticmaalay;

x) wadarta iyo Nuucyada Adeegyada kale ee dheeriga ah (M-VAS); iyo

kh) dhacdo kasta maaliyadeed oo dakhli soo geliya shirkadaha.

2. Shirkad walba waa in ay ku soo gudbisaa wixii cabasho ah oo ku saabsan qaan-sheegad canshuuraha ku waajibay muddo 5 maalmood gudahood ah marka loo diro iyadoo soo raacinaysa faahfaahinta caddeymaha keydiyaha Faahfaahinta Wicitaannada (CDR) iyo wixii kale ee caddeyn ah ee loo baahdo.
3. Hay'addu waxay sidoo kale u gudbinaysaa Wasaaradda Maaliyadda 15ka bisha Janaayo ee sannad kasta qaan-sheeg kale oo caddeynaysa cashuurta ku waajibtay dakhliga sanadlaha ah ee shirkad weliba iyo tirada inta lambar ee shidan (Active).
4. Hay'addu waxay iskaashi iyo xog-isweydaarsi la sameysan kartaa Hay'adaha kale ee hubinta dakhliga Isgaarsiinta ee caalamiga ah si loo hubiyo saxnaanshaha xogta iyo ka hortaga ka-been-sheegidda heshiisyada wicitaannada dibadda.

## Qodobka 9aad
## Dhawrista Xogta

1. Iyadoo maanka lagu hayo waajibaadyada xog-dhawrista ee ku xusan Qodobka 16aad ee Sharciga Isgaarsiinta Qaranka, Nidaamka Dawladdu Maamusho ee Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo hubinta Tayada Isgaarsiinta waa in loo maamulaa si waafaqsan shuruudaha soo socda:

b) xakamaynta isticmaalka xogta: waa in Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka dammaanad-qaadaa in dhammaan xogta iyo macluumaadka lagu soo gudbiyey Nidaamka Dawladdu Maamusho ee Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo hubinta Tayada Isgaarsiinta loo isticmaalo la-socodka iyo kormeerka Shirkadaha Isgaarsiinta, iyadoo la ilaalinayo xogta sirta ah ee Shirkadaha Isgaarsiinta; iyo

t) qarinta macluumaadka shakhsiyaadka: Hay'adda Isgaarsiinta Qaranku waa in, inta lagu gudo-jiro hawlaha baaritaannada iyo kor-joogtaynta Shirkadaha Isgaarsiinta, si nidaamsan u qarisaa macluumaadka gaarka ah ee shakhsiyaadka iyo macaamilaadka, si loo dhawro xogta shakhsiyaadka iyo macluumaadka kale ee xasaasiga ah oo aan cid kale oon ku habboonayn in ay aragto.

2. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranku waa inay baaritaanno joogto ah ku sameysaa Nidaamka Dawladdu Maamusho ee Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo hubinta Tayada Isgaarsiinta si ay u xaqiijiso in farsamooyinka xog-dhawrista ee Nidaamku yihiin kuwo ku filan, oo wax-ku-ool ah.
3. Shirkadaha Isgaarsiinta waa in ay sidoo kale baaris joogto ah ku sameeyaan nidaamyadooda ururinta iyo maareynta macluumaadka kuwaasoo ku xiran Nidaamka Dawladdu Maamusho ee Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo hubinta Tayada Isgaarsiinta si ay u xaqiijiyaan in farsamooyinka xog-dhawrista ee nidaamyadu yihiin kuwo ku filan, oo wax-ku-ool ah.
4. Shirkadaha Isgaarsiinta waa inay fuliyaan baaritaannada lagu cayimay qodobbada sare iyagoo ka cabbir qaadanaya hal-beegyada ay tilmaantay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.
5. Sidoo kale, Shirkadaha Isgaarsiinta waa in ay fuliyaan dhammaan tilmaamaha ku qeexan Sharciga Dhawrista Xogta ee 2023, iyo Xeer-nidaamiyeyaasha Hay'adda Dhawrista Xogta Soomaaliyeed.

## Qodobka 10aad
## Kormeerka iyo Ciqaabaha U-hoggaansanaan La'aanta Xeer-nidaamiyaha

1. Si loo ogaado falalka lidka ku ah shuruudaha iyo waajibaadka ku qeexan Xeer-nidaamiyahan, Hay'adda Isgaarsiinta Qaranku waa in ay fulisaa kormeer joogto ah oo lagu ogaanayo sida Shirkadaha Isgaarsiinta ugu hoggaansan yihiin Xeer-nidaamiyahan.
2. Digniin qoraal ah ayaa ka dhalan doonta falka ugu horeeya oo ay ku kacdo shirkad isgaarsiineed ee ka soo hor-jeedda Xeer-nidaamiyahan, iyadoo la farayo shirkadda ku xad-gudubtay Xeer-nidaamiyaha inay si degdeg ah u fuliso tallaabooyin ay ku saxayso xad-gudubkeeda, balse waa haddii xad-gudubku aanu ahayn mid halis ah oo lagu carqaladaynayo ujeeddooyinka Xeer-nidaamiyaha ama aanu ahayn xad-gudub lagu ciqaabayo sharci ama xeer kale.
3. U-hoggaansanaan la'aanta Xeer-nidaamiyahan ee ay sii socoto digniinta ka dib waxay soo jiidan doontaa ganaax lacageed oo lagu saleyn doono culeyska

u-hoggaansanaan la'aanta ah kaasoo laga fahmi doono saameynta falku ku yeeshay hawlaha kor-joogtaynta ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.

4. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranku waxay xaq u leedahay in ay ku soo rogto ciqaabo ay ka mid yihiin laalista ama kala-noqoshada rukhsadda, haddii u hoggaansanaan la'aanta Xeer-nidaamiyaha ay noqoto mid la caadeysto ama mid muujinayso tixgelin la'aan cad oo ka dhan ah qodobbada Xeer-nidaamiyaha.

## Qodobka 11aad
## Habraaca Ganaax Ku Soo-rogida

1. Haddii Hay'addu hesho xog ku saabsan xad-gudub ka dhan ah Xeer-nidaamiyahan oo ay gashay shirkad, Maareeyaha Guud ayaa qiimeynaya xogta, haddii uu u arko in xogtu tahay mid lagu kalsoonaan karo, waxuuna u saarayaa guddi bilaaba baaris rasmi ah oo lagu hubinayo in Xeer-nidaamiyahan lagu xad-gudbay iyo in kale.

2. Guddiga loo saaray baarista waa inuu ku gaaraa 10 (toban) maalmood gudahood go'aan hordhac ah oo sharraxaya in Xeer-nidaamiyaha lagu xad-gudbay iyo in kale. Haddii go'aanka hordhaca ah uu muujiyo in lagu xad-gudbay, Guddigu wuxuu la xiriirayaa shirkadda lagu eedeeyey xad-gudubka, wuxuuna u sheegi doonaa go'aanka hordhaca ah.
3. Shirkadda lagu eedeeyey xad-gudubka ee lala socodsiiyey in go'aanka hordhaca ah laga gaaray, waxay xaq u leedahay in ay qoraal difaac ah oo ay la socdaan caddeymaha ay u aragto lagama-maarmaan ugu gudbiso Guddiga, 3 (saddex) maalmood gudahooda laga bilaabo marka lala socodsiiyey go'aanka hordhaca ah.
4. Guddiga ayaa qiimeyn doona difaaca qoran iyo caddeymaha ay shirkadu soo gudbisay. Haddii difaaca qoran iyo caddeymuhu ay ku guul-dareystaan inay beeniyaan xaqiiqooyinka uu ku saleysan yahay go'aanka hordhaca ah, Guddigu wuxuu soo saarayaa go'aanka kama-dambaysta ah, isagoona ku soo rogi doonaa shirkadda ganaaxa ku habboon. Guddigu waa inay ku soo saaraan go'aanka kama-dambaysta ah 10 (toban) maalmood gudahood oo ka bilaabmaysa xilliga laga helay shirkadda difaaca qoran iyo caddeymaha.
5. Ka hor inta aysan gaarin go'aanka kama-dambaysta ah, Guddigu wuxuu ka dalban karaa shirkadda inay u soo gudbiso caddeymo iyo macluumaad dheeraad ah oo cayiman, kuwaasoo ka caawin kara Guddiga inuu gaaro go'aan cadaalad ah.
6. Mar kasta oo Guddigu dalbado caddeymo iyo macluumaad dheeraad ah, shirkaddu waa inay u hoggaansantaa codsiga oo ay ku soo gudbisaa caddeymaha iyo macluumaadka laga dalbaday waqtiga uu Guddigu go'aamiyey.

## Qodobka 12aad
## Bixinta Ganaaxa

1. Haddii aanay shirkadu ka qaadan rafcaan go'aanka ganaaxa ee kama-dambaysta ah ee Guddiga muddo 30 (soddon) maalmood gudahooda ah oo ka bilaabanaysa xilliga go'aanka la soo saaray, waa inay muddada loo cayimay gudaheed, ku shubtaa ganaaxa lagu soo rogay Khasnadda Mideysan ee Qaranka ee ka furan Bankiga Dhexe, iyadoo raacaysa tilmaamaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.
2. Haddii shirkadu aysan diidin ganaaxa lagu soo rogay, laakiin xaaladdeeda dhaqaale awgeed ay awoodi weydo inay bixiso dhammaan ganaaxa lagu leeyahay hal mar, Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, isagoo la tashanaya Wasiirka Maaliyadda iyo Wasiirka Isgaarsiinta & Teknoolojiyada, wuxuu kula heshiin karaa shirkadda qorshe lacag-bixineed, kaasoo u oggolaanaya shirkadda inay iskaga yaryareyso ganaaxa waqti kooban gudihiis.

3. Haddii shirkad ay ku guul-dareysato inay bixiso ganaaxa lagu soo rogay, Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, iyadoo u mareysa Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, ayey waxay ka codsan kartaa maxkamadda awoodda u leh inay si caam ah u iibiso inta ku habboon ee hantida shirkaddu leedahay si Dawladdu u hesho ganaaxa lagu leeyahay shirkadda.

## Qodobka 13aad
## Rafcaannada Ka Dhanka ah Go'aannada Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka

1. Shirkadii ka soo hor-jeesata ganaaxa uu ku soo rogay Guddiga ay u saartay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, waxay rafcaan ka dhan ah go'aanka Guddiga u qaadan kartaa Maxkamadda Sare ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Shirkaddu waa in ay rafcaanka ku xaraysata 30 (soddon) maalmood gudahood oo ka bilaabanaysa taariikhda go'aanka kama-dambaysta ah uu soo saaray Guddiga Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.
3. Go'aanka Maxkamadda Sare waa kama-dambays.

## Qodobka 14aad

## Muddada La Soo Dhammeystirayo U-hoggaansanaanta Xeer-nidaamiyaha

1. Shirkadaha Isgaarsiintu waa in ay muddo aan ka badnayn 4 (afar) bilood gudahood ku soo dhammeystiraan u-hoggaansanaanta dhammaan qodobbada Xeer-nidaamiyahan ka dib markii ay ansixiyaan Golaha Wasiirrada. Si ay ugu suurto-gasho u-hoggaansanaan buuxda, Shirkadaha Isgaarsiintu waa in ay sameeyaan diyaar-garowga lagama-maarmaanka ah muddada 4 (afar) biloodka ah.
2. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, waa in ay soo dhammeystirtaa muddo aan ka badneyn 3 (saddex) bilood gudahood Nidaamka Dawladdu Maamusho ee Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo hubinta Tayada Isgaarsiinta.
3. Ku-xirnaanshaha Nidaamka Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo hubinta Tayada Isgaarsiinta wuxuu shardi lagama-maarmaan ah u yahay Rukhsadda Shirkadaha Isgaarsiinta dalka (license Terms and Conditions).

## Qodobka 15aad

## Dhaqan-galka Xeer-nidaamiyaha

1. Iyadoo la tixgelinayo Qodobka 14aad ee Xeer-nidaamiyahan , wuxuu dhaqan-gelayaa markuu ansixiyo Golaha Wasiirrada ee Xukuumadda JFS uuna saxiixo Ra'iisul Wasaaraha XJFS, isla markaana lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda kadibna waxaa lagu daabici doonaa Boga internet-ka ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.

2. Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknoolojiyadda iyo Wasaaradda Maaliyadda ayaa ku kor-joogteyn doona Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka dhaqan-gelinta Xeer-nidaamiyahan.

## Lifaaqa Kowaad
## Jadwalka Ganaaxa iyo Ciqaabaha

### 1. Ganaaxyada:

| Lr. | Qeexitaan xad-gudubka ka dhanka Xeer-nidaamiyaha | Ganaaxa la go'aamiyey |
|---|---|---|
| 1 | Ku xirmid la'aanta waqtiga loo asteeyey Nidaamka Dawladdu Maamusho ee Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo hubinta Tayada Isgaarsiinta | US$400,000 |
| 2 | Hakinta ku xirnaanta Nidaamka Dawladdu Maamusho ee Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo hubinta Tayada Isgaarsiinta | US$800,000 |
| 3 | Khiyaano ama carqaladeyn lagu sameeyo nidaamyada ururinta iyo maareynta macluumaadka ee Shirkadaha ee ku xiran Nidaamka Dawladdu Maamusho ee Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo hubinta Tayada Isgaarsiinta | US$300,000 |
| 4 | Xad-gudubyada ka dhanka ah qodobbada kale ee Xeer-nidaamiyaha. | US$150,000 |

### 2. Ciqaabaha kale ee aan ganaax ahayn

| Lr. | Qeexitaan Xad-gudubka ka dhanka qodobbada kale ee Xeer-nidaamiyaha | Ciqaabta la go'aamiyey |
|---|---|---|
| 1 | Ku xirnaansho la'aan Nidaamka Dawladdu Maamusho ee Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo hubinta Tayada Isgaarsiinta muddo ka badan 6 (lix) bilood sababo farsamo darteed. | Xaddidaadda Addeegyada Rukhsadda Isgaarsiinta. |
| 2 | Ku xirnaansho la'aan Nidaamka Dawladdu Maamusho ee Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo hubinta Tayada Isgaarsiinta muddo ka badan lix (6) bilood sabab la'aan. | Kala-noqoshada Rukhsadda Isgaarsiinta. |
| 3 | Bixin la'aanta ganaaxyada lagu soo rogay. | Hakinta Rukhsadda Isgaarsiinta ilaa ganaaxa laga bixiyo. |